servion MORTGAGE

## HAGAHA

# IIBSADAHA GURIGA

Macluumaad waxtar leh oo fududeynaya nidaamka amaahda guryaha kaana caawinaya inaad gaarto yoolalkaaga shakhsiyeed iyo dhaqaale.

KUWANI WAA WAXYAABAHA AAD K

# ARKI DOONTO GUDAHA



## 4 BAAHI LOO QABO IIBSASHADA GURI

Hage degdeg ah oo ku saabsan waxa aamihiyayaashu ka raadiyaan iibsadayaasha guryaha.

## LIISKA DUKUMINTIYADA LOO BAAHAN YAHAY

Liiska waxyaabaha aad soo urursanayso si hanaanka ansixinta ee amaahiyahaagu u noqoto mid bilaa turxaan ah.

## SAMEE IYO HA SAMEYNIN

Liiska khaladaadka guud ee saameynta ku yeelan kara ansixinta.

## SAMEE IYO HA SAMEYNIN

Liiska khaladaadka guud ee saameynta ku yeelan kara ansixinta.

4 BAAHI LOO QABO

# IIBSASHADA GURI



## TAARIIKHDA DEYNTA

- Waa intee suuragalnimada in aad amaahda dib ugu soo bixiso waqtigii loogu talagalay?
- Waa sidee taariikhdaadii lacag bixinta ee hore ee deyn bixiyeyaasha kale?
- Ma jirtaa sharaxaad macquul ah oo ku saabsan wixii caqabado ah ee kula soo gudboonaaday?

### XEERARKA GUUD

- Waa inaysan jirin lacag lala daahay 12-kii bilood ee la soo dhaafay
- Khadad amaaheed badan oo leh ugu yaraan taariikh 24 bilood ah
- Ugu yaraan hal khad amaaheed oo xadkiisu ka badan yahay $1,000

## AWOODA BIXINTA

- Ma awoodi kartaa lacag bixinta cusub?
- Waa maxay suurtagalnimada inaad sii wado awoodista bixinta lacagtan cusub?
- Haddiiba aad weydid dakhligaaga waqtigan, miyaad rajeynaysaa inaad beddesho isla dakhligaas?

### XEERARKA GUUD

- Laba sanno oo shaqo isku mid ah
- Wadarta lacag bixinta guriga iyo deynta oo ah 40-45% bishii, dakhliga canshuurta kahor

## KAASH

- Ma maareyn kartaa lacagah haddii dakhligaaga loo joojiyo sababtay doontaba ha noqotee?
- Ma bixinaysaa lacag hordhac ah? Haddii ay jawaabtu haa tahay, immisa?

### XEERARKA GUUD

- Bixi ugu yaraan 3.5% qiimaha iibkaaga (bixinta lacagta hordhaca ah ee dhabta ah ee loo baahan yahay way kala duwanaan doontaa waxaanay ku xiran tahay barnaamijka amaahdaada).
- Waa inay koontadaada dhigashada ama keydinta ku jiraan lacagta 2-3 bilood oo guriga ah kadib xiritaanka.

## DAMAANAD

- Waa maxay nooca hantida maguurtada ah ee aad iibsaneyso? (Guri fooq dheer ka dhisan, guri caadi ah, guri hal-qoys ah, laba guri, guri la warshadeeyay)
- Muxuu yahay qiimaha suuqa ee xilligan ee dhismahu, sidee ayaana lagu go'aamiyey arrintaas?

4 BAAHI LOO QABO

# IIBSASHADA GURI

## DEYNTA: SHANTA QODDOB EE DHIBCAHAAGA DEYNTA

### TAARIIKHDA LACAG BIXINTA (35%)

Qaabka aad u bixisay biilashaadii hore. Taariikhda dheer ee bixinta lacagta waqtigeeda iyo seegid la'aanta lacag bixintu waxay saameyn wanaagsan ku yeelan karaan dhibcahaaga deynta.

### DEYNTA LAGUGU LEEYAHAY (30%)

Qadarka lagugu leeyahay marka loo eego wadarta qadarka amaahda ee la heli karo. Dadka leh dhibcaha deynta ee ugu fiican waxay u muuqdaan inay hoos u dhigaan xisaabtooda.

### DHERERKA TAARIIKHDA AMAAHDA (15%)

Da'da khadadka deynta ee furan - marka ay dheer tahay taariikhdaada deyntu, waabay ficantay.

### NOOCA DEYNTA (10%)

Isku darkaaga kaararka deynta ee hadda, xisaabaha tafaariiqda, amaahaha shirkaddaha maaliyadeed, iyo amaahaha guryaha - noocyo kala duwan oo deyn ah ayaa aad u fiican.

### WEYDIIMAHA (10%)

Immisa codsi oo amaah ah ayaad buuxineysaa. Weydiimaha warbixino badan ee deymeed ayaa hoos u dhigi kara dhibcahaaga.



# Awooda: Immisa ayaad awoodaa inaad bixiso bishiiba?

**A. Wadarta Dakhliga Qoyska ee Billaha ah ee Canshuurta Kahor**

Dakhli la diiwaangelin karo

A. $ ____________________

**B. Wadarta Dakhliga Qoyska ee Billaha ah x 45%**

B. $ ____________________

**C. Wadarta Bixinta Deynta ee Billaha ah**

Baabuurta, kaararka deynta, amaahda ardayga, iwm.

C. $ ____________________

**D. Xisaabi B-C = D**

Lacag bixinta ugu badan bil kasta ee guryaha waxaa ku jira canshuurta iyo ceymiska guryaha

D. $ ____________________

# DUKUMENTIYADA LOO BAAHAN YAHAY

### SI AAD U BUUXISO SHURUUDAHA, WAA INAAD AMAAHIYAHAAGA SIISAA MACLUUMAADKAN SOO SOCDA:

- Nuqulka liisanka darawalnimada
- Bayaanka W2 ee loo shaqeeyahaaga ee labadii sanno ee ugu dambeeyay
- Warqada liistada mushaharka ee 30-kii maalmood ee ugu dambeeyay
- Bayaanada [koontooyinka] dhigashada/ keydinta ee 2-dii bilood ee ugu dambeeyay - dhammaan bogagga

### WAXYAABAHA SOO SOCDA AYAA SIDOO KALE LAGA YAABAA INAY KU CAAWIYAAN, HADDII AY KHUSEYSO:

- Canshuur celinta shakhsiyadeed ee 2-dii sanno ee ugu dambeeyay- dhammaan boggaga iyo jadwalada
- Haddii aad iskaa u shaqeysato ama shaqo laguu igmaday, fadlan dhammaantood ku dar:
    - Canshuur celinta shakhsiyadeed ee 2-dii sanno ee ugu dambeeyay - dhammaan bogagga iyo jadwalada
    - Canshuur celinta shirkadaha ee 2-dii sanno ee ugu dambeeyay - dhammaan bogagga iyo jadwalada
- Rubacii ugu dambeeyay (3 bilood) ee istok/ dammaanadaha /lacagaha la wadaago /401 (k) - dhammaan boggaga
- Caddeynta dhibcaha kulliyada (haddii aad qalinjabisay 2-dii sanno ee ugu dambeeyay)



TALLOOYINKA

# ANSIXINTA DEYNTA EE BILAA TURXAANTA AH


## Samee:

- Sii wad inaad ku bixiso amaahdaada ama kiradaada waqtigeeda
- La soco dhammaan koontooyinkaaga jira
- Sii wad u shaqeynta cidda aad u shaqeyso immika
- Hayso isla shirkadda caymiska ee aad immika adeegsatid
- Sii wad deganaanshaha guriga aad immika degan tahay
- Sii wad inaad u adeegsatid [kaarkaaga] deynta sidii caadiga ahayd

## Ha Sameyn:

- Ha iibsan wax weyn (gaari, doon, dahab, iwm)
- Ha dalban ama furan kaar deymeed cusub
- Ha beddelin shaqooyinka adigoon marka hore ogeysiin deyn bixiyahaaga
- Haku u kala wareejin wixii baaqi ah ka laba koonto
- Ha iska bixin wixii deyn ah ee lagugu leeyahay adigoon marka hore ogeysiin deyn bixiyahaaga
- Haku iibsan alaabta guriga kaarka deynta
- Xir wixii koontooyinka kaarka deynta ah
- Ha beddelin koontooyinka bangiga
- Ha dhaafin xadka ama ha ka badin xadka koontooyinka kaarkaaga deynta
- Ha isugu geyn deyntaada 1 ama 2 kaar oo deymeed
- Ha qaadan amaah cusub ama ha bilaabin mashruuc dib u hagaajinta guriga ah
- Ha furan koonto taleefanka gacanta ah oo cusub
- Ha ku biirin naadiga jir dhiska
- Ha bixin wixii amaah ah ama kaararka deynta ah adigoon marka hore ogeysiin deyn bixiyahaaga

**Waxyaabahan la sameeyo iyo kuwa aan la sameynin ayaa kaa caawin doonaan inaad ka foggaato dib u dhac ku yimaada hanaanka amaahda kadib markaad gudbisid codsigaaga.**







KUWANI WAA WAXYAABAHA AAD

# FILAN KARTO

## Isgaadhsiinta

**Waxaanu ogeysiin doonaa adiga iyo wakiilkaaga markaanu:**

- Helno qiimeyntaada
- Soo gudbi amaahdaada si loo hubiyo
- Ka hel shuruudahaaga hubinta
- Hel oggolaanshaha kama dambeysta ah ee hubinta
- Ka hel foomka amaahda guriga (CD) shirkadda kala-wareejinta

## Bixinta dukumiintiyo dheeraad ah

Aad bay muhiim u tahay inaad ku keento dhammaan dukumiintiyada la codsaday waqtigooda. Haddii aadan sidaas sameyn, taariikhdaada xiritaanka ayaa laga yaabaa inay dib u dhacdo. Toddobaad gudihiis laga bilaabo markaad saxeexdo codsigaaga amaahda, waxaad u baahan doontaa inaad noo soo dirto dhammaan dukumintiyada la codsaday.

Inta lagu jiro hanaanka hubinta, waxaa lagu weydiin karaa macluumaad dheeri ah oo loo yaqaan "shuruudo." Fadlan xaqiiji inaad noogu soo dirtid wixii macluumaad dheeri ah sida ugu dhakhsaha badan.

## Adkeynta ceymiska mulkiilayaasha guryaha

Waa masuuliyadaada inaad hesho ceymiska mulkiilayaasha guryaha. Ceymiska mulkiilayaasha guryahu waa inuu jiraa ugu yaraan 10 maalmood ka hor taariikhda xiritaankaaga. Beddelida heshiiska deynta, waxaan u baahan doonaa nuqulka immika ee shahaadada ceymiska ee mulkiilaha guriga iyo macluumaadka xiriirka ee wakiilkaaga ceymiska.

# WAKHTIGA
## HANAANKA AMAAHDA GURYAHA

- CODSI
- ANSIXIN HORDHAC AH
- LA AQBALAY BANDHIGA
- XADDIGA DULSAARKA EE CAYIMAN
- CUSBOONEYSIINTA DUKUMIINTIYADA DEYNTA (HADDII LOO BAAHDO)
- DALBO QIIMEYN & KALA-WAREEJIN
- IIBSO CEYMISKA MULKIILAHA GURIGA
- OGGOLAANSHO SHURUUD LEH
- SOO GUDBI SHURUUDAHA HUBINTA
- U DIYAAR AH XIDHITAANKA/ANSIXIN
- MAALINTA XIDHITAANKA



WAA MAXAY

# TALLAABOOYINKAAGA XIGAA

Haddii aad dareento inaad diyaar u tahay inaad bilowdid hanaank, aanu kaa caawino inaad go'aamiso habka ugu wanaagsan ee aad horay ugu socon karto. Waxaan rajeyneynaa inaan ka jawaabno qaar ka mid ah su'aalahaaga, laakiin waxaanu inbadan kusoo jirnay xirfadan waxaanan ognay inaad wali wax intaa ka badan qabi kartid! Sidaas darteed, naga soo wac (651) 631-3111! Taasi waa waxa aan halkan u joogno.

**651-631-3111**

**myservion.com**



Servion Mortgage waa DBA of Servion, Inc. NMLS #1037.